



Marka Ay Qabsadaan Canshuur Celintaada Gobolka

When They Keep Your State Tax Refund

Waa Maxay Dib U Qabsashada Dakhliga?

Waaxda Dakhliga Minnesota waxay haysan kartaa canshuur celintaada dakhliga ama hantida ee Minnesota, ama abaal-marinta baqtiyaanasiibka haddii aad lacag ka qabtid wakaalad ka tirsan gobolka ama deegaanka. Waaxda canshuurta waxay lacagta la soo celiyo u dirtaa wakaaladda aad lacagta ka qabtid. Tan waxaa lagu magacaabaa dib u qabsashada dakhliga. Waxaa loo isticmaalaa in lagu aruuriyo lacagaha dheeraadka ah ee laga qaatay gargaarka dadweynaha, biilasha caafimaadka laga qabo isbitaalada magaalada ama deegaanka, daynta dugsiyada, masaruufka ilmaha, iyo ganaaxa ama magta kiisaska dambiyada.

Goormaa Ayaay Lacagta Ii Soo Noqoto Ka Badbaadda Dib U Qabsashada?

Xataa haddii aad qabtid lacagta, ma qaadan karaan lacagta lagu soo celiyo haddii:

- Dayntaada qaabilsan tahay biilashaada caafimaadka, **iyo** dakhligaada **marka aad heshay xanaanada caafimaadka** ka hooseeyo heer goan. Heerkaan wuu isbadalaa sannad kasta. Wac Waaxda Dakhliga (Department of Revenue) oo laga helo (651) 556-3003 si aad u ogaato heerka dakhligaada sanaskaas. Dakhliga waxaa lagu saleeyaa inta ruux (caruur iyo dad waaweyn) oo adiga aad xanaanayso.
- Dayntaada waxay la xariirtaa lacago dheeraad ah ee lagaa siiyay gargaarka dadweynaha, adigana aad weli qaadatid gargaarka dadweynaha. Tan macnaheeda waxa waaye MFIP, GA, gargaarka xanaanada cunugga iyo wixii la mid ah. Laakin waxay qaadan **karaan** lacagaha lagu soo celiyo inta aad weli ku jurtid gargaarka haddii lacago dheeraad ah lagu siiyay maxaa yeelay waxaad sheegtay been ama waxaad si ula kac ah u jebisay sharciyada barnaamijka gargaarka.
- Waxaad wakaaladda la yeelatay qorshe lagu bixiyo lacagaha, waxaad la qabsatay bixinta lacagta **iyo** qorshahana wuxuu sheegaa in ay isticmaali doonin dib u qabsasho,
- Dayntaada waxay ka badan tahay 6 sannadood. Waxaa jira waxyaabaha qaar oo ka reeban sharcigaan. Tusaale, waxay dib u qabsan karaan daymaha amaahda la siiyo ardayda xataa 6 sannadood kaddib.



Dhammaan kiisaska kor ku qoran, ma qaadan karaan lacagaha lagu soo celiyo, laakin waa in aad iyaga ugu sheegtid si qoraal ah.

Waa Maxay Ogeysiiska Loo Baahan Yahay In Aan Helo?

Marka hore wakaaladda deegaanka ama gobolka ayaa wuxuu Waaxda Dakhliga weydiiyaa in uu qaato lacagaha lagu soo celiyo. Markaas 5 maalin gudaheeda wakaaladda u haaysato in aad iyaga ka qabtid lacag waa in ay kuu soo dirto ogeysiis ku saabsan xuquuqda aad leedahay.

Ogeysiiska wuxuu adiga kuu sheegaa:

- waxaa daynta ku saabsan tahay, inta ay tahay, iyo marka ay dhacday,
- in ay rabaan in ay isticmaalaan dib u qabsashada dakhliga,
- in aad ka doodi kartid daynta iyo haddii aad hoos imaaneysid dib u qabsasho,
- sida aad uga hortagi kartid dib u qabsashada dakhliga,
- in aad racfaan ka qaadan kartid.



Sidee Ayuu U Shaqeeyaa Habka Racfaanka?

U qor wakaaladda sheegeyso in aad iyaga ka qabtid lacag, **ha** u qorin Waaxda Dhakhliga. Warqadda mesha kore ku qor in ay tahay Racfaanka Dib u Qabsashada Dakhliga ("Revenue Recapture Appeal"). Si kooban u fasis sababta ayan u haysan karin lacagta kuu soo noqoto. Sababaha waxay noqon karaan in

- aadan qabin lacagta ama
- xataa haddii aad qabtid lacagta, waa lagaa badbaadiyay - fiiri kor.

Haayso koobiga warqadda. Wakaaladda waa in ay hesho racfaankaada 45 maalin gudaheeda laga bilaabo taariiqda ogeysiiskooda laguugu soo diro boostada. Wakaaladda waa in ay qabtaan dhageysi 30 maalin gudahooda. Ma u baahnid qareen, laakin, waxaad wacan kartaa mid aad ka heshid la talin.

Xaq uma leedahid dhageysi haddii daynta laga soo saaray xukun ama amar maxkamadeed.

Haddii aadan wakaaladda ka helin ogeysiis ku saabsan xuquuqda aad leedahay, weli waxaad qaadan kartaa racfaan:

- U qor wakaaladda si aad u weydiisatid racfaan.
- Waqtiga 45ta maalin ee aad ku qaadatid racfaanka ma bilaawdo ilaa aad ka heshid ogeysiis qoran in ay iyaga rabaan in ay isticmaalaan dib u qabsashada dakhliga.
- Haddii wakaaladda sheegto in ay kuu soo dirtay ogeysiis, ee aadan adigana marna helin, markaas waxaad dhageysi ku heleysaa labo arrimood. Marka hore, dhab ahaantii ma heshay ogeysiis? Marka labaad, ma qaadan karaan lacagaha lagu soo celiyo?

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**